SIDEE

IMTIXAAN KASTE LOOGU GUULEYSTAA ?



1. Marka hore Alle kaasho oo mar kaste bari, ka hor imtixaanka iyo inta imtixaanka lagu jiro iyo marka aad ka baxdidba.

• Ka hor imtixaanka: Alle weydiiso in imtixaanka aad galeysid Alle kuu fudeydiyo inta aad akhrineysidna kuugu beego suaalaha laga yaabo in lagu soo daro.

• Imtixaanka dhexdiisa: sooma ogid in wax kaste oo inagu dhaca ay sabab u tahay dambiyo aynu Alle ka galnay...Haa xaqiiqdii...Hadaba intaad imtixaanka ku jirtid Alle dambi dhaaf weydiiso, markaste oo suaali kugu adkaatana is deji oo ku celceli dikriga iyo "Astaqfurullaah"...Arintanina waa mid uu Alle iigu fududeeyey imtixaan kaste oo aan galay.

• Imtixaanka ka dib: Alle ugu mahadnaq in imtixaankaa aad soo dhameysey, sababtoo ah markaste oo Alle u mahadnaqdid wuu kuu siyaadinayaa nimcada aad haystay...Imtixaanka kadibna warwarka oo kugu badan lahaa, waad kala degeysaa Alle idamkii.

2. Imtixaanka inta aanad bilaabin, isku day inaad nafta dejisid, hadii biyo ku agyaallaan iska cab, macmacaanka aad ugu jeceshahay iska soo qaado, muddo laba saac ah ayaad kursi aad keligaa fadhiyi doontaaye.
3. Isha wada mari hal mar imtixaanka oo dhan, waxa laga yaabaa suaal ku jirta qeybta goobo-gelida inay jawaab u noqon doonto qeybta ka-shaqeynta ahe, qof degdegsan way iska yartahay inuu ogaado sirtaas ama uu ku baraarugaba'e.
4. Bisinka iskaga bilow, "wax aan bisinka lagu bilaabin barako ma yeeshaan" ayaa hore loo yidhiye.
5. U qeybi suaalaha imtixaanka 3 qeybood:

- Qeyb fudud: waa qeybta markaba maskaxdaada kusoo dhaceysa ee aanad ka shakisneyn.
- Qeyb adag: waa qeybta aanad garanayn, xitaa hadii 10 saacadood lagu siiyo aanay maskaxdaadu soo saareyn, ama aanad akhrinba ee aad ogtahay.
- Qeyb iska dhexe: waa qeybta u baahan fikirka iyo in wakhti lagu siiyo si ay maskaxdaadu usoo xasuusato.

  Ku Bilow qeybta fudud...LAAKIIN....ka diktoonoow waa laysku quusiyaaye oo keliya adigoon degdegeyn oo si fiican u akhriyay ka jawaab, hadii aad sidaas sameyso (Hadhow markaad dib u eegaysid, jawaabtaa aad dooraty waxba haka badelin ilaa aad 100% hubtid inaad khaladay, laakiin hadii shaki kaaga jiro, ogow jawaabtaadaa hore ayaa sax ahe. Markaad qeybtaa dhameyso, waxaad ku xigsiineysaa qeybta fikirka u baahan: wada

akhri oo mid mid u dul istaag adigoo biyahaaga iska cabaya, macmacaankaagana muudsanaya, dhinac kalena Alle ka baryaya....Maskaxdu markay nafis dareento ayay wax badan soo tufi doontaa, idam Allena suaalahaa hadii aanad ka wada shaqeyn dhamaantood, wad ka wada shaqeyn doontaa badankooda.

Waxaa kuusoo hadhay qeybta adag, maskaxdaada deji oo muddo maskaxdaada ka yar saar inaad imtixaan ku jirtid....iska naso...kadibna suaal kaste ka fikir inaad jawaab xagaaga ka timid u sameyso adigoo kaashanaya waayo aragnimadaadii hore ama wixii aad macalinkaaga ka maqli jirtid ama magaaladaba.....ugu yaraan jawaab aad sababeyn kartid u hel jawaabtaada.

6. Suaalaha goobo-gelida loo yaqaan, hadii aanad waxba ka garaneyn, isku dey inaad suaasha si fiican u fahantid kadibna afarta doorasho ama 3da doorasho ee lagu siiyey, midh kaste oo khaldan meesha ka saar ee aad ogtahay inaanay sax aheyn, waxa laga yaabaa in 2 ama hal midba kuusoo hadho oo sax ah, haday laba soo hadhaan, kala saar.....laakiin waa inaad sababta sheegi kartaa aad taas u dooratay.....imtixaanka dhexdiisa qoryo-tuur waxba kuu tari maayo, suaashan aad u qoryo tuurayso 2 ama 5 darajo ayaa saaran, sidaad ugu tanaasulaysaa waxaas oo darajooyin ah.

7. Ku dedaal in suaal kaste oo darajooyin badani ay saranyihiin sida 10 ama 15 aad si qurux badan ugu jawaabto ama ugu yaraan aanad ka tegin.....badanka dhicitaanka aan arkay waxa keena suaalihii aad qofkii uu moodayo inay isku darajooyin yihiin, oo awooda wuxuu saarayaa mid hal darajo saarantahay isagoo ka tagaya mid 10 darajo saarantahay.

8. Bilowga imtixaanka ha isku deyin inaad hareerahaaga eegto ama qish aad raadiso...QISHKU waa waxa arday badan oo xariifiin ah ridey, qof suaasha haduu u fiirsan lahaa uu garan lahaana seejiyey...imtixaanka isku dey inaad suaal kaste aad adigu isweydiiso sidaad jawaab ugu sameyn laheyd..ardey baad arkaysaa haduu imtixaanka uu isagu keligii ka shaqeyn lahaa uu aad u sareyn lahaa balse markuu jawaabo khaldan uu uruursaday uu dhacay...Noqo mid Alle ku kalsoon kadibna naftiisa.
9. Maskaxdaada geli inaan imtixaanku aheyn ciqaab lagu ciqaabayee, ogow inuu yahay waxyaroo lagu kala reebayo ADIGA iyo dadka kaa liita ee aan u qalmin inay soo gudbaan...ee ADIGU ha ku biirin dadkaa lagaa reebayo hana isku tirin.

10. Imtixaanka markaad dhameyso, neef dheer qaado oo biyahaagii iska cab, kasaar maskaxdaada inaad imtixaanba ku jirtid, kana fikir jaamacadda facultyga aad doonaysid iyo jaamacadda aad galaysidba. Kadibna kusoo noqo oo jawaabihii aad qortay dib u wada eeg oo wax kaste oo aad qortay sheeg sababta aad kuwa kale uga dooratay ama jawaabtan aad u qortay.

Intani waa in aan ka helay maamulaha dugsigii aan ka baxay oo talooyinkaa na siiyay imtixaanka ka hor, iyo wax farsamooyin aan ku faaiday intaan imtixaan soo galayay

Alle ha kuu fudeydiyo imtixaanka, hana kaa siiyo darajooyin aanad filanayn oo aad u sareeya.